

Waa maxay farbarashada habaysan?

Farbarashada habaysan waa hab lagu baro ardayda sida wax loo akhriyo.

Maxay u egtahay habka ama sidee loogu dhawaaqaa?

Farbarashada habaysan waxay raacdhaa hanaan gaar ah oo lagu barto akhriska, laga bilaabo xirfadaha fudud ilaa kuwa adag, oo ku salaysan sida aan u naqaano dadku inay wax akhriyaan. Sidoo kale waa mid toos ah. Macalimiinta waxay diiradda saaraan xirfadaha saxda ah ee ardaydu u baahan yihiin inay ogaadaan si ay uga gudbaan hadalka una gudbaan erayada daabacan. Farbarashada habaysan waa barasho gacan-ku-hayn ah oo leh ku celcelin badan, dib u eegis, iyo sixid qaladaadka markay ardaydu bartaan xirfadahooda wax akhris. Hanaanka farbarashada akhris-qoraalka habaysan waxay bilaaban kartaa carruurnimada hore waxayna sii socon kartaa ilaa dugsiga sare. Dhageysiga, hadalka, akhrinta, iyo qorista waa la isku lammaaniyaa si loo baro xirfadaha akhriska.

Waxay u egtahay:

- Barista xarfaha magacyada iyo dhawaaqyada,
- Soo saarista xarfaha iyo sida ay erayada isugu qabtaan,
- iyo dhisidda erayada xarfaha iyo shayada kale.
- Ku garaacista ama sacabka dhawaaqa iyo shibbanayaasha erayada,
- Isticmaalka jaantuska khariidaynta ereyga si loo tuso ardayda sida mid walba ugu dhawaaqa eray gooni ah wuxuu ka kooban yahay hal ama dhowr xaraf, iyo
- Sameynta jumlado isticmaalaya ereyo kaararka ku qoran.

Isticmaalka habkan, ma waydiisanayno ardayda inay "qiyaasaan" ama isticmaalaan "tilmaamaan macnaha" in buug lagu baro sida erayada loo akhriyo.

Xagee ayaan wax badan ka baran karaa?

Farbarashada habaysan waxay ku salaysan tahay ururin badan oo daraasado cilmi baaris ah oo ay sameeyeen barayaasha, khubarada hadalka iyo luqadaha, dhakhaatiirta cilmu-nafsiga, dhakhaatiirta neerfaha, iyo khabbiro kale. Tani waxaa mararka qaarkood loo yaqaanaa Akhriska Sayiska.

Degmo dugsiyeedkaagu waa inay awoodaan inay ku siiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida ay u isticmaalayaan hab akhris-qoraal oo habaysan. Waxa kale oo jira ururo badan oo bixiya macluumaadka ku saabsan wax akhris-qoraalka habaysan iyo hawlaho qoyska saaxiibtinimo la leh si kor loogu qaado xirfadaha akhriska. Tusaale ahaan, Ururka Caalamiga ah ee Dysleksi (DyslexiaIDA.org) iyo ReadingRockets.org. Booqo bogga webseytka ee Xarunta Ka-qaybgalka Qoyska ee Gobolka Ohio ee OhioFamiliesEngage.osu.edu si aad u aragto ilo badan oo kan oo kale ah oo siiya taageera xooggan qoyska, dugsiga, iyo iskaashiga bulshada fayoobida ardayga iyo guusha waxbarasho!